

# Xoojinta Tallaalka COVID-19

## Waa maxay qiyaasta xoojinta tallaalka COVID-19?

Xoojinta waa qiyaas kale oo ah tallaalka COVID-19. Waxaad heli kartaa qiyaasta xoojinta lix bilood ka dib labada qiyaasood ee hore. Saraakiisha Caafimaadka Dadweynaha waxay ku talinayaan xoojiyaal labaad oo loogu talagalay dadka 50 sano iyo ka weyn iyo kuwa difaaca jirkoodu hooseeyo. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa halkan <https://www.nshealth.ca/coronavirusvaccine>

## Waa maxay sababta aan ugu baahanahay qiyaas xoojin ah?

Tallaalka koobaad ka dib, difaacaagu wuu yaraadaa wakhti ka dib, markaa waxaad weli qaadi kartaa COVID-19. Xoojiyaha ayaa ka dhigaaya difaacaaga ka hortagga COVID-19 mid xoog badan muddo dheer. Waxaad ilaalin doontaa naftaada iyo dadka kugu xeeran markaad qaadato xoojin.

## Ma yihiin qiyaasaha xoojinta isla qaabaynta tallaalkii labada qiyaas ee hore?

Haa. Tallaalka xoojinta COVID-19 waa isla qaabaynta tallaallada COVID-19 ee hadda jira. Si kastaba ha ahaatee, tallaalka xoojinta Moderna COVID-19 waa kala bar qiyaasta tallaalka ee dadka la siiyay taxanahooda/qaybahooda hore

## Miyaan "si buuxda ah u tallaallanahay" haddii aanan helin qiyaas xoojin ah?

Haa. Pfizer iyo Moderna, si buuxda ayaa lagu tallaallay laba toddobaad kadib qiyaastaada labaad. Janssen, si buuxda ayaa lagu tallaallay laba toddobaad kadib tallaalka.

## Xoojiyahee waa inaan qaataa?

- Dadka da'doodu tahay 30 sano iyo wixii ka weyn waxay heli karaan qiyaas buuxda oo Pfizer ah ama nus qiyaasta Moderna. Dhib ma leh tallaalka aad marka hore qaadatay.
- Waayeelka ku nool Daryeelka Muddada Dheer waxay u baahan yihiin qiyaas buuxda oo Pfizer ah ama qiyaas buuxda oo Moderna ah.
- Dadka 18 ilaa 29 sano waa inay qaataan tallaalka xoojinta Pfizer. Waxaa jirta halis yar oo waxyeel/saamayn dhifka/naadirka ah ee wadnahaaga.
- Carruurta da'dooda u dhaxayso 12 ilaa 17 sano ee qaba dhibaatooyin caafimaad kuwaas oo kordhiya halista cudurro daran waa inay sidoo kale qaataan qiyaasta xoojinta Pfizer.

## Waa maxay muddada sugitaanka si loo qaato tallaalka kuwa natiijada baaritaanka laga helay COVID-19?

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan istaraatiijiyada/xeeladaha tallaalka Nova Scotia, fadlan booqo: <https://novascotia.ca/coronavirus/vaccine/>

## Naag uur leh ma qaadan kartaa xoojinta? Ammaan ma u yahay ilmaha/beebiga?

Haa, waa ammaan in qofka uurka leh uu helo tallaalka, oo ay ku jiraan qiyaaso xoojin ah. Haweenka uurka leh waxay halis ugu jiraan inuu ku dhaco cudur aad u daran haddii ay qaadaan COVID-19, iyo talaaladuna waxay caawiyaan ka hortagga tan. Tallaalka COVID-19 dhib uma aha uurjiifka/ilmaha. Intaa waxaa dheer, unugyada difaaca jirka ee hooyada ayaa u gudbiya uurjiifka soo koraya, sidaas darteed ilmahoodu waxay leeyihiin xoogaa difaac ah marka ay dhashaan. Hooyadu sidoo kale waxay u gudbin kartaa unugyada

difaaca jirka caanaha naaska kuwaas oo sidoo kale caawin kara ilaalinta ilmaheeda. Hooyada la tallaalay waxay u badan tahay inay yar tahay inay cudurka u gudbisno ilmaheeda. Haweeneyda uurka leh waxay heli kartaa qiyaasta xoojinta koowaad ee tallaalka COVID-19 120 maalmood kadib qiyaasta labaad (ama ka dib qiyaasta koobaad ee Janssen)

### **Miyaan u baahanahay xoojinta sanad kasta?**

Wali ma cadda ilaa inta ay tallaaladu bixin doonaan difaac iyo in xoojinta loo baahan yahay sannad kasta sida tallaalka hargabka. Dadka qaangaarka ah, su'aalahan aad bay muhiim u yihiin sababtoo ah habka difaacayagu wuu daciifaa markaan waynaanno/waayeel noqonno. Khubaradu waxay daraaseynayaan muddada-dheer ee tallaalka difaacu uu fidinaayo.

### **Ma qaadi karaa COVID-19 haddii aan hore u qabay/igu dhacay?**

Haa, waad qaadi kartaa COVID-19 haddii aad hore ugu qabtay, gaar ahaan Omicron. Tallaalku wuxuu ku siinayaa difaac dheeraad ah, xitaa haddii aad hore u lahayd COVID. Tallaalku wuxuu kaa caawin karaa ka hortagga jirro daran iyo dhimasho xitaa haddii aad mar kale qaaddo.

### **Xayiraadaha badankood hadda waa la qaaday. Taasi miyay la macno tahay in COVID-19 aanu jirin, ama in uu khatar ahayn mar dambe?**

Maya, COVID-19 wali wuu jiraa. Wali waxay khatar u tahay dadka da'da ah iyo dadka qaba xaalado dabadheeraad ah, gaar ahaan haddii aan la tallaalin. Waxa kale oo weli muhiim ah in la raaco tilmaamaha caafimaadka sida xirashada maaskaro meelaha gudaha/xiran ah, dhaqida gacmahaaga marar badan, daboolida afka markaad qufacayso, iyo in la qaato tallaalka.

### **Goorma ayaan heli karaa xoojiyahayga asaasiga ah?**

Waxaa jira waqtiyo kala duwan oo u dhexeeya qiyaasaha tallaalka iyo xoojiyaasha, taas oo ku xiran da'da, xaalada caafimaadka, iyo shuruudaha u-qalma:

- Inta u dhaxaysa qiyaasta labaad iyo xoojinta koowaad:
  - 168 maalmood (24 toddobaad) dadka da'doodu tahay 12 ilaa 69 sano
  - 120 maalmood (17 toddobaad) dadka da'doodu tahay 70 iyo kawayn
- Inta u dhaxaysa kor xoojiyaha koowaad iyo labaad:
  - 168 maalmood (24 toddobaad) - Da'da 50 ilaa 69 sano
  - 120 maalmood (17 toddobaad) – Dadka uurka leh ee helay xoojinta ka hor intaanay uur qaadin.
  - 120 maalmood (17 toddobaad) - Dadka da'doodu u dhaxayso 50 ilaa 69 sano awooda difaacooda dhexeeya ama si aad u daran ah, iyo kooxaha xaqa u leh\* (eeg hoos)

Fadlan ogow: Caafimaadka Dadweynaha wuxuu ku talinayaa in la helo xoojinta labaad xilliga dayrta si difaac wanaagsan loo helo xilliga qaboobaha iyo hargabka soo socda. Sidoo kale, tallaallo cusub oo laga yaabo inay bixiyaan ka-hortag ballaaran oo ka hortaga noocyada Omicron ayaa laga yaabaa inay diyaar noqdaan. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan eeg [here](#)

### **Sideen ku heli karaa xoojin?**

Intaadan bilaabin kahor:

- Waxaad u baahan tahay kaarka caafimaadka Nova Scotia oo ansax ah si aad ballan uga qabsato onlayn.
- Waxaad u baahan tahay nambor telefoon haddii ay dhacdo in lagula soo xiriiro.
- Sii iimaylkaada marka aad ballanta qabsanayso. Waxaad heli doontaa iimaylka xaqiijinta ee ballantaada, iimaylka xusuusin ah maalin ka hor ballantaada, iyo iimaylka ballantaada ka dib wadata koobiga diwaanka tallaalkaaga.

### Sida Ballanta Loo Qabto:

Waxaad samaysan kartaa ballan:

- Onlayn rugta caafimaadka: <https://novascotia.flow.canimmunize.ca/en/covid-flu-booking>
- Wac 1-833-797-7772 (Isniin ilaa Jimce, 7 subaxnimo ilaa 7 galabnimo iyo Sabti ilaa Axad, 10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo). Waxaad u baahan tahay inaad ka wacdo nambor taleefoon Canadian ah iyo aad joogtid Canada markaad soo wacdo. Haddii macmiilku u baahan yahay tarjumaad, tani waa habka ugu wanaagsan ee ballan lagu qabsan karo (eeg "Adeegyada Tarjumada la heli karo" ee hoose)

Macluumaad dheeraad ah, fiiri ISANS's website [How to Book a Vaccine Appointment - Project Beacon](#)

### Sida Loo Helo Rug Caafimaad Oo Ballan La'aan ah:

Waxa kale oo tallaalada lagu bixiyaa rugaha caafimaad/kilinigyo kala duwan. Goobahan iyo waqtiyadani waxay is beddelaan toddobaad kasta. Waxaad ka heli kartaa liiska ugu casrisan ee rugaha caafimaadka beesha halkan: <https://www.nshealth.ca/drop-in-vaccine-clinics>

Farmasiyaasha sidoo kale waxay bixiyaan rugaha caafimaadka:

<https://pans.ns.ca/walk-covid-19-vaccine-clinics>

### Adeegyada Turjumaanka ee la heli karo

Haddii aad u baahan tahay adeeg luqad aan Ingiriisi ahayn, waxaad waydiisan kartaa turjumaan marka aad ballanta qabsanayso wac 1-833-797-7772 (in ka badan 125 luqadood oo kala duwan ayaa diyaar ah). Khabiir takhasus leh ayaa dhammaan su'aalaha caafimaadka iyo baaritaanka macaamiishua iyo wuxuuna ka jawaabi doonaa wax kasta welwel iyo walaac ay macamiisha ka qabaan tallaalka. Farmasiyadu waxay kaloo bixiyaan buug-yar luqado kala duwan ku qoran oo ay macaamiisha akhrin karaan marka la tallaalo. Waxaa kaloo jiri kara goobta shaqaale turjumi kara.

### Coronavirus (COVID-19)

#### COVID-19 Vaccine

#### Recommended intervals between vaccine doses

#### Vaccine safety and possible side effects

#### COVID-19 vaccine: Canadian Immunization Guide

#### Frequently Asked Questions about COVID-19 Vaccination | CDC